# Golaha Wakiilada JSl

## *Waaxda Hadal Qoraalka*

*Minuteska*

**Dooda Xeerka *La-dagaalanka Budhcad Badeeda***

***Doodan waxaa ka qayb qaatay 12 Mudane waxayna Socotay 2 maalmood oo ahayd Maalimihii Axada iyo Isniinta ee 19-20/02/2012***

Fadhiga waxaa gudoominayay **Md. C/raxman Maxamed C/laahi (Cirro)**

**Gudoomiyaha:-** Maanta waxaan bilaabaynaa doodii Xeerka Ladagaalanka Budhcad Badeeda, Mudanayaasha dooda ka qaybqaadanayaa ha is qoreen, dooda ka horna waxaan ku soo dhoweynayaa Gudidda dhaqaalaha oo Xeerkii Baanka Dhexe warbixntiisa soo jeedinaysa, waxaana warbixinta Gudidda Golaha ka hor akhriyay **Md. Cali Xasan Maxamed.**

**Dooda Xeerka La-dagaalankaBudhcad badeeda…..**

1. **Md. Ibraahim Mahdi Buubaa:-** **(21 min 14 sec)** Marka hore dhamaan waxaan idinku salaamayaa salaanta Islaamka A/S/W, waxaynu gudagalnay Doodii Xeerka Budhcad Badeeda, markaa intaanan Gudagalin Xeerkan**,** waxaan jecelahay inaan laba qodob iftiimaiyo, anigu waxaan ka tirsanahay Gudidda Arrimaha Gudaha, Difaaca iyo Nabadgalyada, waxaanu wadnay inaanu curino laba xeer oo Qarankani aad ugu baahan yahay labadaa xeer oo gudidda arrrimaha gudaha hoostagayay, oo kala ahaa Xeerka La-dagaalankaArrgagixisada, kan kalena wuxuu ahaa Xeerka La-dagaalankaBudhcad badeeda, nasiib wanaag anigoon wali bilaabin, laakiin isla garanay in xeerka dalku u baahanyahay in la curiyo, ayaa Xukumada somalialnd inoo soo gudbisay xeerkii La-dagaalankaBudhcad badeeda oo iminka ina horyaala.

   Makaa waxay u badan tahay in baahidii aanu arkaynay ay xukuumaduna arkaysay in xeerkaa loo baahan yahay oo dani Qaranka ugu jirto, sidaa darted ayuu xeerkani ku yimi, markaa waxaan odhan karaa waxaa ka dhiman araartii xeerka iyo ujeedooyinkiisa sida xeerkan ku qoran, waxaana u daynayaa shaqaalaha Golaha in qodobada xeerka waafajinayaa jiritaankii ee dastuurka ay ku soo daraan,

   Anigu ujeedooyinka Xeerka ayaa dhowr qodob ka odhan lahaa:-

   1. Ilaalinta aminga iyo sugida nabadgalyada bada Somaliland
   2. Badbaadada Maraakiiba maraya Bada Somaliland iyo Badaha Caalamiga ahba.

3. La-dagaalankaBudhcad badeed oo laba ah A) Bada Gudaheeda biyaha Somaliland iyo Biyaha Caalamiga aa B) Barriga Budhcad badeedu isku diyaariyaan, marka la arko iyagoo isku abaabulaya ama u diyaar garoobaya sida xeerkuba tilmaamayo.
4. Ka hortaga khatarta ay budhcad badeedu ku hayaan Ganacsatada Somaliland iyo kuwa caalamiga ahba
5. Baadhida danbiilayaasha iyo xabsi kuhaynta dabiilayaasha budhcad badeeda marka la soo qabto.

Markaan Xeerkan u soo noqdo oo magaciisu yahay Xeerka La-dagaalankaBudhcad badeed waxaan moodaa in turjumaadiisa iyo macnihiisu ay woxogaa (Complicated) tahay laakiin markaad u fiirsato waxaa kuu cadaynaysa ujeedaha iyo kalmadu inay saxan yihiin siday u qoran yihiin.

**Qodobka 1**[aad] Qeexida danbiga Budhacad Badeed **Farqada 1**[aad] waxaan ka dhigay **(*fal sharci daro ah oo ku dhisan weerar dhimasho ama burburin oo ay sameeyaan shaqaalaha markabku ama rakaabka saran markab ama diyaara*d** gaar loo leeyahay iyadoo ujeedadu tahay in la helo faa'iido dhaqaale oo loogu kaco falkaas markab ama diyaarad ku sugan badweynta ama hanti saaran), sidoo kale waxaan ku deray (***doon)*** oo aan sadex kaga dhigay markab iyo diyaarad.

**Qodobka 4**[aad] [Ciqaabta] danbiga Budhcad Badeed, waxaan ku sii dabadaray (Hadii ***aanu gaysan Dil)*** waayo markuu wax afduubayo wuxuu gaysan karaa inuu shaqaalaha dilo, ama isku dayga wado wuxuu gaysan karaa dil.

**Qodobka 5**[aad] Kalmada Ikhtisaas waxaan ku badalay ***(Awoodaha Maxkamadaha Somaliland)***, **Qodobka 6**[aad] markab ama diyaarad Budhcad badeed, marka la leeyahay Diyaarad waxa iman karta diyaarad bada taagan la afduubo, ama diyaarad la afduubay fal budhcad badeed loo adeegsado.

**Qodobka 7**[aad] [waxaan] ka saaray qodobkan ***(ama Xamuulka ama dadka saran)***
**Qodobka 10**[aad] halka badalaada Xadiga waxaan ka dhigay **(reebanaanta badalaada Xadhiga)** oo ah in la iibsadaa xaaraan ah. Ugu danbeyn **Qodobka 16**[aad] ee dhaqan galka xeerka (Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka labada Gole ansixiyaan madaxweynuhu Saxiixo).

2. **Md. Dr Cali Yuusuf:-** Marka hore Gudoomiye iyo Mudanayaal waad Salaamantihiin, Xeerkan La-dagaalankaBudhcad Badeeda ee aynu ka hadlaynaa waa mid aad iyo aad loogu baahanyahay aadna Muhiim u ah oo aduunkoo dhami u soo jeedo, lagagana hadlayo shirka London ee soo socda, waa xeer aynu doonayno in aduunku ina kaalmeeyo, anigu waxaan qabaa in xeerkan aad u yar yahay oo loo baahan yahay inuu intan aad uga balaadho, Xeerkan meesha laga soo qaatay ee Xeerkii 1959kii, waxay ila tahay (reference) in laga qaato dawladahan ku takhasusay inay dagaalamaan budhcad badeed, markaynu maxkamad saarno aduunku wuxuu ina waydiinayaa Xeerkaynu ku Xukunay.

   Diyaaradaha iyaga waxaan odhan lahaa afduubkooda iyaga waa in xeer gooniya laga dhigaa, Xeerkana lagu daro budhcad badeeda dadka sida sharci darada ah badaheena uga kaluumaysta waayo iyaba waa budhcad badeed, ama khayraadka ku jira gurta, sidoo kalena dadka taakuleeya

ee gacan ka siiya budhcad badeed ama u kala turjama budhcad badeeda iyo ku wax laga afduubay, iyo kuwaasi ciqaabta ay yeelanayaan

Ciqaabta budhcad badeeda kolka la qabto lagu xukumayo iyo xadhiga, ilaalada badeenu haday la kulmaan budhcad badeed ilaa xadkee bay hubka iyo awooda isticmaalayaan, maraakiibta iyo doonyaha ay wataan ma gubayaan, dadkana ma laynayaan.

W**axaan soo jeedinayaa**:-

- Marka Xeerka waxyaabaha khaladaadka ah laga saxo, waa yahay Xeer loo baahan yahay oo muuhiima aynu ansixiyno.

**Gudoomiyaha:-** Waxaan ku soo dhoweeynayaa Xeer ilaaliyaha Qaranka Golaha hortiisa Xeerka ka difaacayay, warbixina uga siiyo Xeerkan (draft)kiisa iyo sidii loo samayn doono.

**Xasan Maxamed Aadan-Xeer-ilaaliyaga Guud**:- Mudanyaal waxaad ii ogolaataan inaan warbixin guud xeerkan idinka siiyo cida soo samaysay, heerkuu soo maray iyo waxa loola jeedo, xeerkani markii aan xilka qabtay ayuu ugu horeeyay hadana waxaan ka qaybgalay dhowr shir oo lagu saxayay wax badana lagaga badaley (draft)kiisii ugu horeeyay, Xeerkani wuxuu la tisqaadayaa.

Xeerka Bada caalamiga ah ee 1982 soo baxay, Xeerkaasi waxaa ku jira Qodobkiisa 101aad Piracy oo ah budhcad badeed, wuxuu ka hadlayaa markab dagaal, wuxuu ka hadlayaa budhcad badeeda iyo cidii gasha iyo (territorial waters) ka, mana aha definationkani waxaan anigu jeebkayga kala soo baxay ee wax standard ah oo dawladaha caalamkoodhami ay ku heshiiyeen, inaguna manta (part) kaga nahay inaynu qaadano Xeerkaa lagu heshiiyay oo aynu ku dhaqano, waayo qeexidaa budhcad badeedu maaha waxaynu inagu buuraynee ee wax la islaaqatay oo la inooga horeeyay inaguna ku adapt garaynay, somaliana wakhtigii aynu ka midka ahayn way adapt garaysay oo way qaadatay laakiin may implementgarayn oo fursadii ugu horeysay ee inta baarlamaanka la horgeeyay oo inta (reform) lagu sameeyo lagu (transfer) gareeyo.

Markaa xeerkan aad baa loogu baahan yahay dad aqoon u lehna way inagu jiraan, tusaale ahaana sidii Xildhibaan Cali sheegayay, Puntland waxay ku dartay iyagoo cudurdaar uga dhigaya (piracy)ga oo badahooda ku badan in qofkasta illegal uga kaluumaysta bada xuduudooda, markaa taasi waxay keentay inay ka baxaan, heshiiskii caalamiga ahaa, Xeerkiina wuxuu noqday waxaan jirin, waayo waxaa laguu diidayaa inaad awood u yeelato (capacity)gagaaga lumiso oo (definition) ama danbi kale dhaco,waxaad ogtihiin aqoonsi ma haysano badeenana waxaa mara maraakiib dawlado kale leeyihiin sida reer galbeedka oo intay budhcad badeed ku qabtaan iyagu maxkamadeeya, waayo, awood uma lihin (stander)ka caalamiga ah ma buuxinaysaan.

(Markaa definition)ku waa mid noocaas ah, tusaale ahaan, afduubyada bada xeerkalaa nidaamiyha, laakiin biyaha bada xeerkan ayaan nidaamiya, shuruucduna way kala madax banaan yihiin, fadlan xeerkani standard buu ku dhisanyahay, siduu u shaqaynayo waan isla eegnay waa laga (debate) gareeyay, ilaa jabuuti iyo syshels baan isla tagnay, kobanheegan baa laga hadlay, iminka bisha march waxaa laga sugayaa in somalland labadan Xeer inay horgayso oo in ka badan 60 dal isugu imanayaan, raga badan oo khubaro ahna waan isla eegnayh***, fadlan waxaan idinka***

***codsanayaa inaan xeerkaa lagu sii daalin ee wixii su'aalo ah aanu ka jawaabno idinkuna ansixisaan***

3. **Md. Jaamac Xasan Aadan: -** waxay aniga ilatahay in su'aaluhu waxa badan guubaabin lahaayeen oo ay soo hawl yarayn lahaayeen mar haduu inoo fadhiyo taasi waa taladyda. Ilaa xalay ilaa saaka waan akhriyaynay, muhiimada xeerku leeyahayna waan wada garanaynaa iyo sida degdega ah ee la inoo ga baahan yahay, anuu in yar ayaan ku dari lagaa sida uu u waafaqayo xeer hoosaad keena iyo xeerarka ina baxa, si uu u waafaqo, marka hore waa in eraybixin la sameeyaa oo lagoogu horaysiiyo, si wax walba waxa loola jeedo loo cadeeyo, tusaala ahaan marka laga hadlayo Markab, Doon. Diyaarad, halka waxaas oo dhan la tixilahaa waxaan odhan lahaa halagu badalo Gaadiid badeed.

   Waxaan ka loon ku dari lahaa in dadka badeena Sun ta ku aasaya, ama sida sharcidarada ah uga kaluumeysanaya waan in xeerka lagu daro igaguba waa budh cad badeede, sida xeer ilaaliyuhu inoo sheegey, mar hadaaney xeerka raaci Karin waa in xeerkale loo sameeyo.

   **Waxaan soo jeedinayaa:-**

   - In xeerkan marka wixii khaladaada ah laga saxo, oo dagdag loo ansixiyo..

4. **Md, Ibraahim Axmed Haybe:-** doodu kama taagna muhiimda xeerka ee waxaa fiican maadaama oo aynu Golihii Sharci dejinta nahay in wixii inaga baxaa wax aan madmadaw lahayn oo aynu inagu fahansanahay ahaadaan, markaan Xeerka akhriyay waxaa jirta meelo badan oo igu adkaatay inaan fahmo, waxaa ku qoran diyaarado iyo maraakiib, markabka bada maraya hadaan soo qaato waxaa wata ciidanka dadkii lahaa markabka, hadii markaa ay iyagu afduub ku sameeyaan markabkii ay wateen, maxaa inaga khuseeya, ma ii ogolyahay inaan faragaliyo ma la ii ogolyahay, waxay ila tahay inaan laguu ogalayn, bal horta meel aan iska dhigno maraakiibtaa waawayn ee bada maraysa inaga xil inagama saarna.

   Waxaa kaloo meesha ku qoran, markab bada maraya oo ganacsi oo rakaab sida ama shidaal sida ama xamuul, oo markab yar oo budhcad wadato lagu weeraray, waynu aragnaa waa taan ka hadlayno, waxaa aynaan garan budhcad diyaarada weerartay ee waxana maqli jirnay afduub diyaaradeed., budhcad badeeda iyo diyaarada ha laka saaro.

   Inaga inta inaga khusaysa waxaa ku yaala, Ganaaxa iyo Xadhig budhcad badeeda la qabto ee **5-20**sano ganaaxooda laga dhigay, waxa sanadihii ina soo dhaafay, bada waxay budhcad badeedu ku qabatay oo markab sida (1000 tan patrol) ah, markaa haday qarxiyaan, (disaster)ka uu bii'ada ukeeni lahaa intuu le'egyahay, kan waxaa gaystay hadii la yiraahdo **5-20**sano sano hala xidho, tan kale ninka wax afduubay markab kaliya ma afduubine wuxuu afduub markab dad saran yahay, dad haduu ku laayona oo dil gaysto, maxaa laga yeelayaa, dadkaa dhintay iyo nafahaa baxay wixii laga yeelayay haduu sharcigu (international) yahay, inaga shuruucdeenii Qaranka u taalay ee ahayd cida gaysata dil waxaa lagu xukumayo dadka wax gaystay marka dalka la keeno waa in shuruucda dalka u taal la waafajiiyo Sharcigani waa sharci aan aad ugu baahanahay, waxase wanaagsan in 60ka wadan ee xeer ilaaliyuhu inoo sheegay in la horgeeyo noqoto wax wanaagsan oo loo arko inay ka soo baxday dawlada iyo Qaran dad wax garanaya inay ka soo baxday, waxaynu doonayno inaynu gudbino ee xeer ahaan u gudbino waa in la fahmaa. .

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Markaa waxaan ku talin lahaa in dib loo soo habeeyo, oo Golaha Wax Wanaagsan ay ka baxaan, intuu sidan Xeerku yahay inaynu Gudbino maaha,

5. **Md. Ibraahim Caraale Cabdi:-** Run ahaantii Mudanihii iga horeeyay iyo aniguba la iskuma khilaafasan inuu xeerkani yahay mid muhiimad wayn leh loona baahanyahay, Muhiimad weyna u leh Jiritaankeena, oo hadaynaan noqon umad difaacan karta danaheeda ma nihin umad jirta, Xeerarkaan samaynaynaa mid Maxaliya ama caalamiya, waa inay noqdaan qaar u adeegaya jirtaankeena, waxaana loo baahan yahay waxa asaageen ka leeyahay muskhlida budhcad badaeedka, mandaqadan aynu daganahayna aad bay ugu badan yihiin oo dhibteeda waxbaa inaga soo gaadhaya.

   Xeerku haduu leeyahay gol-daloolooyin leeyahay xataa xeer la'aantuu dhaamaa, waa la sixi karaa, oo markaan samayno (Amendment) baa lagu samaynaa, markaa waxaan soo jeedin lahaa in Xeerka waxaan ku dari karno ku darno, wixii khaladana ka saarno, aan ansixino oo sii dayno, markaa waxaan gudihiisa ku jira markaynu horta saxno,

   Markaan Xeerka Guda galo, Qodobka ee Xadhiga iyo ciqaabta **5-20sano** sano ayaa lagu wada xukumi danbiilayaasha Budhcad badeedka, ma xuma in wax ay gaystaan lagu xukumaa, laakiin waxa weeye, haduu nafa gooyo, anigu waxaan odhan lahaa halagu daro haduu dili gaysto, oo aanay noqon in dadku iskaga dhiirado inuu dil gaysto yidhaahdo 20 sanaa lagu xukumayaa, markaa waa in qodobkaa lagu daraa haduu nafgooyo oo wax dilo ciqaabta la marinayo ilayn inaguba Xeerar baynu ka leenahay ee qofkii wax dila waa dil lagu xukumaa, Qodobkan waxaan kaloo la eegi lahaa, **Qodobka 11aad** oo isna sheegaya Xadhig **10-25** sano dabcan qofku ama sarkaan ha ahaadee haduu budhcad badeed nimo ka qaybqaatay waa danbiile, markaa labada Qodob ha la iswafajiyo oo yaan lakala duwin, oo mid ha la qaato labada Qodob.

   **Qodobka 1aad farqadiisa 2aad,** waxay u baahan tahay in la sii waadax gareeyo, rabitaanka waxay keeni karto qofkii action lama samayn oo waxba laguma cadayn, oo marka isku day la leeyahay waa rabitaan, markaa qodobkaa waa in la waadix gareeyo.

   **Waxaan soo jeedinayaa:-**

   - Xeerkani maadaama uu muhiimad weyn leeyahay, inta aynu saxno waxaynu u aragno ina sixitaan ay u baahan tahay, waa shaqadeeniiye, inaga wakhtiga ilaalinayna waa inaan si dagdag ah u ansixinaa.

6. **Md. Aadan Muxumed Hoori:-** Xeerka muhiimaddaa leh inuu intaa la e kaado miyaa? Aniga waxaan aaminsanahay inuu yahay xeerkii ugu liitay ee la inoo keeno, daciifnimaa ka muuqata, xataa waxaa aad u liita qoraalkiisa oo khaladaad badan ku jiraan, sharciyadii umada ayaynu luminaynaa, waxaynu gudbinaynaana yaanu noqon wax mad madaw ku jiraan, wxii xukuna ee xeerkan ku yaala dee waa shaqadii Garsoorka iyana waa in laga dhigaa sida waafaqsan Xeerarka Garsoorka waxba ku sii rafan mayo,

**Sidaa darted waxaan soo jeedinayaa:-**

- Aynu u gudbino Gudida Cadaalada oo iyagu intay isu soo guraan, cidii ay khusaysona la soo tashadaan, Xeer wanaagsan ha inoo keento.

7. **Md. Waabeeye:- :-** muhiimada xeerka waynu garaneynaa, waxaan u arkaa in xeerkan baahiyi keentay waxaad modaa in uu baahan yahay (comment) badan oo turjumidii ayaa madmadaw ku jiraa waxaanu baahan yahay in meelo badan la cadeeyo sida la sheegay waxaa ka maqan eray bixintii oo ahayd in loogu horaysiiyo. Xeerkan marka la qeexayo cida budhcad badeed ah waxaa ku jira is ka hor imaad baa ku jira, wuxuu leeyahay budhcad badeed waxaa weeye falkasta oo ku dhisan weerar hubaysan ama qori ha sitaan ama tooray ha ku hubaysnaayeene, markaa waa in weerar Hubaysan, laga dhigaa, Qeexitanka waa in lagu daraa gaadiidka Sida doon, Markab, Laash oo sidaas oo kale loo taxaa, falkana in u jeedadisu tahay hanti waa la sheegaa.

   **Qodobka 3aad** waxaan odhan lahaa Qeexitaanka Markab waa inuu xaga hore maraa oo eray bixinta lagu daraa,

   **Qodobka7aad** marka laga hadlayo lahaanshaha oo uu leeyahay waa inuu haystaa Jinsiyada , hadana Qodobka 12aad waa lala wareeygayaa ayuu leeyahay labada qodob waa la iswaa fajiyaaa,

   **Qodobka 8aad,** baadhis, Qabasho iyo fatishaad halka Fatishaada Baadhis ha laga dhigo, Xubnaha Ciidanka ilaalada halka ku qoran Xubahaha waa in laga saaraa, ilayn gole wakiilo maahee, Ciidanka Ilaalada Xeebaha waa in la dhigaa,

   **Dhaqangalka Xeerka:-** waxa weeye Xeerku wuxuu dhaqan galayaa Marka Labada Gole ansixiyaan Madaxweynuhun Saxiiso.

8. **Md. Maxamed Faarax Qabile:-**anigu shay aan meeshaba ku jirin ayaan doonayaa inaad is dul taago, had iyo jeer marka (legal draft)gu samaysmayaan, waxay leeyihiin saldhig ay ka farcamaan, ujeedaha xeerkani malaha saldhiga distooriyo oo ka farcamo sida uu dhigayo Qodobka 128aad ee dastuurka, xeerkani wuxuu dhigan yahay (Proposal) la inoo soo gudbiyay, Markaad eegto (nature)ka ama Dabeecada Xeer ee Golaha Sharci dejinta ka soo bixi jiray waxaad moodaa in iminka in inta (Competition) hor yimaado in loo taago Codka, sida uu dhigayo **Qodobka 48aad** ee Xilgudashada Golayaashu, Golayaasha waa in Xilkoodu waajibnimo u gutaan si waafaqsan Dastruurka, farqada kale waxay sheegayaa in xeerka ka baxaya ilaalinta arrimaha siyaasada, dhaqalaha, bulshada iyo Hogaaminta Guud ee siyaasda dalka.

   Dastruuka Qaranku wuxuu sheegayaa **3** ciidan Qaran oo mid waliba (Comman) fulinayo, Xeerna qeecayo Waajibaadka uu fulinayo, markaa Ciidanka Ilaalada Xeebaha waa in Xeer loo sameeyaa oo uu yahay ciidan u baahan, markaa waxaan qabaa inay tahay aafo inagu soo biirtay budhcad badeedu, laakiin labada xeer uu horeeyo Xeerkii Ciidanka ilaalada Xeebaha oo uu qeexayaa Xilka iyo Waajibaadka ay gudanayaan, xeerkana laga horeysiiyaa, Xeerkani waa Xeer loo baahan yahay laakiin waa inuu leeyahay dabeecadii iyo erey bixintii Xeerka looga baahnaa saldhiga dastuuriya ku fadhida,

   **Waxaan soo jeedinayaa:-**

   - in xeerkan dib loo celiyo lana Guto waajibaadkii Dastuura oo Xayndaabkiisii lagu celiyo, mana qabo in doodiisa la gudo galo,

9. **Md. Saleeban Cawad Cali:-** marka hore Xeerkani kuma jirin ajendihii, Xeerarkii muhiimka ahaana kuma jirin, haduu muhiim yahayna ajendaha ha lagu soo daro, in la ina qarda jeexsiiyaana maaha, anigu waxaan leeyahay qofkastoo halkaa soo istaagay wuxuu sheegay in goldolooyin badan ku jiraan dibna loo eego, eray bixintii kuma taalo, qodobka ugu danbeeyaana wuxuu leeyahay, baabi'in waxaa la tirtiray qodobka 205 iyo 206 ee Xeerkii bada ee soo baxay 1959kii dee xiligaa somaliya ayaan Qaran ahayn, Xeerka yaa soo saaray, taasina waxyaabaha u fiirsiga leh bay ka mid tahay, waxaad arkaysaa, in xeerka 206 Qodobdiisu marayaan, xeerkani yahay (abstract) yar oo laga soo jaray, sidaa darted waxaan qabaa, haday tahay nidaamka soo maray iyo nuxurka uu xambaarsanayahayba inay tahay roob yar oo dabayli wado.

   Markaa waxaan leeyahay Xeerkan ha lagu celiyo wadadiisii saxda ahayd, waa in Gudidii ku shaqada lahayd loo dhiibaa, Xeer ilaaliyaha Guudna anagoo ixtiraamaynaaye su'aalo halkan laga weydiiyo, (international community) wax ha laga weydiiyo, Gudidii inaga inoo qaabilsanayd ha loo daayo shaqada, **Secondment badan ayuu helay.**

   **Waxaan Soo jeedinayaa:-**

   - Xeerkan maaha in lagu sii daalo, Mudanayaashuna waxay wada leeyihiin Xeerka dib ha loogu celiyo Gudidii ku shaqada lahayd,

10. **Xaashi Xuseen Caabi:-** Xeerkani waa xeer deg-deg oo dad soo samaysteen, markaa fahma ama fahmina, waxaa la inaga doonayaa inaad shaambada ku dhufataan**,** doodan iyo qayladan aad meesha isla soo taagteen looma baahnayn, xeerkani af ingriisi ayuu ku qoran yahay oo caalamka oo dhan baa lala soo maray, xeer ilaaliyuhuna wuxuu yidhi ilaa sychels baan la soo marnay halkii ugu danbaysay buu marayaa, markaa inagu waxa weeye hadaynu Somaliland meel yar baan aduunyada kaga naal oo aan qiimo lahayn, adikuna waxaad isku haysataan inuu qiimo leedihiin, halkan waxaynu ku leenahay bad yaroo 800 km ah, Xeerkani waxaan leenahay (technical) malaayiin doolar baa lagu soo cunay, waana raganimo, ragu siday ug hadleen aad baan ugubogaadinayaa, waynuna garanay waajibaadkeenii, Xeer iyo dastuur buu dalkani leeyahay, meelna kaga dhici mayno, waa in (procetur)kii xeerarku mari jireen la soo mariyaa oo gudidii lagu celiyaa oo ay ka soo baaraan degaan, markaa ama ha la diido ama ha yaan la diidne inaga wax khald ahi yaanay inaga bixin,

    **Waxaan soo jeedinayaa:-**

    - In waxan oo dooda la isku dhaafo, waa in xeerka nidaamkiisii lagu soo celiyaa oo (procedur) kiisii waa inuu maraa. Guurtiduna marka loo gudbiyo iyana nidaamkiisii marisaa.

**Gudoomiyaha:-** *maanta waxaynu dhamaystiri doonaa doodii Xeerkii La-dagaalanka Budhcad Badeed Mudanayaashii hadhsanaa ay gali doonaan, waxaana Golaha ku soo Celinay Draftkii Xeerka oo doodii shalay ee Mudanayaasha aan ku soo gurney, wixii khaladaad afsomaliga ahaana laga soo saxay, Final Draftkii koobigiisii baritaan keeni doonaa Golaha anagoo ku dari doona dooda mudanayaasha ee maanta gali-doona insha'alaahu, waxaa inala jooga oo sharaf inoo ah sarkaal sare oo ka socda wasaarada arrimaha dibda ee dalka Denmark* ***Ambassador. Thomas lincolan****, waxaa kaloo inala jooga* ***Allan Coll*** *oo ka socda* ***United Nation Office in Piracy, oo ah Co-ordinatin Counsel Piracy*** *Maadaama ay dalka Marti ku joogaan, oo aynu kuguda jirno Xeer Caalamiya, iyaga oo Maanta la kulmi doona Madaxweyne Ku-xigeenka, waxay inagu soo booqdeen Golaha waxaa siinaynaa fursad ay kaga hadli doonaan Xeerkan Caalamiga ah.*

**11. Md. Cali Xasan Maxamed:-** marka hore shirgudoonka iyo mudayaasha way salaamanyihiin, waxaan u qabaa sidii mudayaashii iga horeeyay sheegeen Xeerkan waa xeer loo baahan yahay inuu dalku yeesho, anigu ma garanayo waxa intaas oo xasaasiyada u yeeshay, shalayto ayaa maraakiib Somaliland leedahay lagu qabsaday badaa dalka Cumaan, aduunkoo dhan way saamaysay budhcad badeedu, hadii markaa la inoo keenay Xeerkan magaranayo wax xasaasiyada loo galinayo, oo loo xiisadaynayo, Hadaan xeerka u soo noqdo waa shaqadeena xeerka inaan saxitaan ku samayno, markaa waa qabaa inaan wax kabadal ku samayno sida xildhibaanadu soo jeediyeen.

Erey bixinta iyo mabaadiida guud ayaa xeerka ka maqan bay doodu u badnayd, waxa halkan iga muuqata in draftkii wax lagu soo daray iyadoo ay tahay in final draftka lagu soo wixii wax ka badal iyo kaabis la sameeyay, Qodobka shalay aad looga hadlay waa qodobka 5aad oo confution badan sameynahay, waxaadna moodaa in si khalada loo fahmay, wuxuuna qodobku leeyahay, iyadoo la eegayo xeerka kan Maxkamadaha Somaliland ayaa awood u leh baadhista dacwadaha Budhcad badeed ee lagu galo xuduud bada somalialnd ama meel ka baxsan xuduuda bada Somaliland ee aan hoos iman Xuduuda bada ee dalka kale iyadoo la eegayo jinsiyada qofka, markaa waxaad moodaa in si kale loo turjumay oo la lalahaa dad baa inta Somaliland laga soo qabqabto Somaliland lagu soo xidh-xidhayaa.

Horta marka laga hadlayo danbiyga budhcad badeed, awoodiisa wuxuu ka midyahahy shuruucda universal declarationka sida Human Rightka iyo Genosideka, dhamaan judictionka cida awooda u leh waa universal juriduction, ciidamada ilaalinta badaha Somaliland ama kuwa maraykanka marka laga hadlayo, waxaa weeye conventionka aduunku oo dhan ku heshiiayay, haday ciidamadaadu meel ka baxsan badeena wax ku qabtaan ha u qaadanin inay xadkii ka baxeen, waa sharci baa kaa saran inaad wax ka qabato meelkasta oo danbigu ka dhacay, marka maxkamadaheenu inay xukumaaan khalad maaha, Qodobka ilaa shalay idaacaduhu la wareegayeen Qodobkaasuu ahaa,

**Waxaan ku soo Gabagabeynayaa:-**

- Sixitaanka iyo in xeerka la hagaajiyaana waa waajib ina saran, laakiin ansixintiisu waa inay Noqotaa Mid Goluhu isku raacsan yahay, waayo manta Xeerka baahi badani ma jiro.

12. **Md. Maxamed Barkhad Miigane:-** Salaan ka dib, arrinka doodan dhalisay waxa weeye Xeerka madaxweynuhu soo gudbiyo waa in caadiga Gudida ku shaqada leh loo dhiibo, sida xeerka Hoosaadku sheegayo, taasina waa mid la sixi karo haday dhacdayba**,** Xeerkani maaha mid manta bilaabmay, dawladii hore ayaa xeerkan ayaa ka shaqaysay oo in dooruu socday laakiin Implementationkii muu gaadhin, waxa fiican in taariikhda Xeerka la raaco, labada wadan ee xeerkan si aad u saameeyay waa Syshels iyo Somaliland oo ahlabada Victimska marka laga yimaado somalilaya, Xukuumadani markay timi Xeerkan dedaal badan baa loo galay oo meel badan oo syshels ay ka mid tahay ayaa tagtay iyo meelo badan, Xeerkan laftiisana markii danbe waxaa lagu sameeyay Djabuuti oo waxaa ka qabgalay samayntiisa Djabuubti, Syshels, inaga Somaliland iyo Denmark oo jamacaduu yaal Xeerkani,

    Markaa Xeerkani, waa xeerki markii laga baaraan degay sidiisaa u samaysan oo legal oo attorney generaalku advisor inooga ahaa, Xeerkani waxyaabaha la sameeyay ka maqan waxaa ka mida, araarta waxyaabaha loo Cuskanayo waxaa ka mdi Dastuurka, Xeerka Bada **Qodobkiisa 205**[aad] in isagana la cuskado weeyaan iyo waliba Xeerka kaluunka, saddexdaa Xeer ayaa araartiisa loo cuskanayaa Xeerkan La-dagaalanka Budhcad Badeeda.

    Tan definationka waxaa loo cuskanayaa Xeerka United nation law of seas, definationka iminka loo soo sameeya waa khalada, waayo Xeerka UNs Law of seas **Qodobkiisa 101**[aad] ayaa sheegaya in Xeerkani definationkiisa isaga loo cuskanayo, markaa waxa weeye Xeerkan wax lagama badali karo oo afartaa dal baa soo wada sameeyay, khasaaraha inagu dhacay ayaan idiin sheegayaa, markii inaga iyo syshels aynu soo wada samaysanay waxaa madaxaweynaha oo ku maqan Abudai Madaxweyne Ku-xigeenka, markuu Madaxweynuhu yimina wuu laalay oo lama Hirgalin Xeerkii.

Laakiin iminka markii ay ka qabshatay internationalkii Thomasiyo, waxaa la yidhi xeerkan hadaad sidaa lagula saxiixataan oo aad implementationkiisa bilawdo, point of interest baa idiinku jiro oo Recognitin ayuu idiin noqonayaa, waa waxyaabaha inaseegay, hadana caano daatay dabadood la qabay, markaa xeerkan in wax laga badalo maaha, waa international oo afar wada baa inala qaybsaday.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerkani waxba lagama badali karo oo waa international sidiisa aan ku ansixino oo aan ku qaadano.

13. **Md. Ibraahim Axmed Raygal:-** Shirgudoonka iyo Muanayaasha sharafta leh waan idin salaamay, salaam ka dib, waxaan runtii ahaantii mudanayaal badan oo iga horeeyay ayaa Qodobo badan oo aan soo qortay ka hadlay, markaa ma doonayo inaan repition ku sameeyo, laakiin qaar ka mida baa waxaan jecelahay inaan aad u xoojiyo, Xeerkani markaan ka doodayno waxaa sharaf ii ah inaan garyaqaankiina inala joogo oo aan filayo inuu wax waxtar u leh xeerka ka soo jeedinaya, dhowr qodob baa u baahan inaan cadayno sidii xildhibaan iga horeeyay halka ka xusay, waan aqoonsanahay ku dhulka xidhay ee qaadicu dariiqa ah ee yidhi cawbaanu ku beeranaynaa iyana waa budhcad oo ku budhcadeed badeeday la midyihiin.

Markaa lama soo koobi karo inta budhcad jirta, laakiin iminka waa khaas (specific) waayo waxaynu ka doodynaa waa budhcad badeed, sidaan taariikhda ku hayo 250 sano ka hor baa budhcad badeed ka jirtay aagaa xeerbta, waxayna u samasmeen sidaad u xasuusan tihiin ingriiska fransiiska, jarmal iyo talyaani oo wada jira ayaa waxay arkeen Spanish, Holland iyo Portugal oo taajiray oo dhaafay iyagii, war xagay ka keeneen bay yidhaahdee, ilayn intay xeebaha ka gudbeen oo ilaa aasiya u gudbeen bay xoolo ka keeneen oo milyaneer bay**,** dabadeen way ka dabaqaateen, waxay u faariisteen badaha sychelskan la sheegayo iyo badaheen oo way u budhcadeeyeen ciidan waa taaqaaniinoo dadkan baxraawiga ah ee bada ee ay iska tureen kuwan spanishka iyo ayay intay urursadeen maraakiibtoodii u dhiibteen waxayna yidhaahdeen noo eega maraakiibta wadamadaasi leeyihiin oo way u u gaadhsadeen sidii bay ku soo baxeen afartii wadan ee ingriiska ay ka mid ahaayeen, oo kuwan badii lagu curyaamiyay,

250ka dib ayay tii dib u bilaabantahay khayraadkii baa laka ceshanayaa oo wadama tima dheerta loo yaqaan hindida iyo aasiyaanka khayraadkii doonaya reer galbeekiina way ka ceshanayaa, markaa miskiin baa garabyo la fuulo leh, inagu inan yar oo kaluumaysanay oo wax iska celinayay ayaa waxay isku badashay in rag damac leh oo la maalgalinayo ay 5000 ml ay maraakiibta ka soo qabsadaan, waxaan leeyahay ictiraafka wax weyn bay ka taraysaa waxaanu qabsanayna tanaaba ka dhow oo budhcad badeeda iyo budhcad bariyeedkaba waxoo dhan ayaan ku taageeraynaa oo xeerarkooda ayaan u baasgaraynanaa oo dadkeeena bada jooga ayaan ka shaqaysiinaynaa, oo xeerkan faa'iido ayaa inoogu jirta waan baasgaraynaa.

Xaga erey bixinta waynu iska xagaajinaynaa anigu waxaan soo qortay budhcad badeed maxaa looga jeedaa, Koox maxaa looga jeeda, Ikhtisaas oo kalmad caribiay aynu ka dhigno Awooda Maxkamada, Koox waa budhcad badeed is kooxaysatay, Baadhis, Ciqaab, Sarkaal waxaan ku badalay Naakhuude, markaa xeerkan Habqoraalkiisa iyo luqdiisa sharci ayaynu hagaajinaynaa,

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xildhibaanadii horaan ku raacsanahay waa inaynu Xeerkan oo aan aad ugu baahanahay Ansixinaa. Wa bilaahi tawfiiq.

14. **Md. Ibraahim Jaamac Rayte:-** salaam ka dib, anigu xeerkan aad ugu dheeraan mayo, waxaan ka hadlayaa dhowr qodob ayaan ka hadlayaa, wadama badankooda aduunka shuruucdooda wada badan baanay ku jirin oo ku qornayn, arrintani arrin cusub oo hada soo korodhay, nasiib darona meeshay ka soo korodhay waa meesheenii, aduunyadiina khasaare weyna bay u haysaa, laakiin khasaaraha ugu

weyn waxay ku haysaa oo ah cida ugu tamarta dadka geeska ee inaga iyo sycheles iyo somaliyaba, wadama farabadan waxay dib u habayn ku sameeyeen Xeerkoodii Ciqaabta oo fal danbiyeedkani ka maqnaa.

Waayo xeerarka ciqaabtu intaa way ibadalaan oo falal danbi loo haystay oo la yidhaahdo danbi maaha waa laga saara, qaar danbi loo arkona waa lagu daraa, arrintanina inaga kaliya maaha, Xeerkanina waa dib u eegis lagu samaynayo Xeerka Ciqaabta Guud ee Somaliland, markaa waxaan qabaa waa wax farsamao oo (technical ah) maaha wax siyaasad ku shaqo leh, siyaasada hadaynu ka eegnona waxaynu ka eegi karnaa siyaasada guud ee Qaranka muxuu ka turjumayaa uun baa laga eegi karaa, inagayna inoo banaantahay inaynu eegno, laakiin Xeerk Siyaasada Khuseeya maaha.

Xeerkani waa dhamaystiran oo dhisan, dad khubaro ah baana ka shaqeeyay, oo waxaa daba ka riixayay (Security Counsel), xaga farsamada waxaan qabaa inuu xeerkani dhamaysiran yahay (definition)kiisa iy siduu u qoran yahay hadaad eegto, oo technitions ah ayaa ka shaqeeyay, inagu waxaynu ka eegaynaa national policy, turjumada la turjumay ayaa wax khaldanyihiin baa dhici karta, markaa hadii la isla arko inay turjumaada wax ka khaldan yihiin isla eego way fiican tahahy, arrinta saddexaad ee aan ka hadlayaa waxa weeyaan Qaynuunka Xeerka Security Counsel wada waxaa daba socda faa'iidooyin badan ha ahaato jeelasha oo la hormaryiyo, tababarka shaqaalaha Xabsiyada iyo Shaqaalaha Maxkamadaha oo aqoontooda kor loo qaado, waxaas oo dhan waa faa'iidoyin badan oo Xeerkan daba socda, waxaana filayaa labada xeer way isku xidhanyihiin kan iyo kan Wareejinta Maxaabiista.Qofkuna meeshuu doonayo oo fahmayo in lagu xidhaa waa sax.

**Sidaa darted Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerkan wakhti badan inaan iskaga lumino maaha, waa Xeerar international ah waa labada xeerba aynu siidayno oo aynu Ansixino.

**15. Md. Cali Obsiiye Diiriye:-** Shirgudoonka, Mudanayaasha, Xoghaynta Golaha iy Saxaafaduba way salaaman yihiin, anigu waxaan leeyahay Xeerkan Xaga diinta aynu ka eegno oo diinteena ayaaba ina faraysa in budhcada iyo Qaadicu dariiqa lala dagaalamo, taasaaba inooga macaan tan internationka ah, marka waxaan leeyahay in xeerkan oo diinteenu ogoshahay la shaasheeyo maaha, in maraakiibteena ganacsiga la afduubo waxaan iska xejin karno maaha, Madaxweynuhuna wuxuu inaga codsaday inaan soo dedejino, anigu taa waxaan qabaa in shirka London in lagu faano in la doonayo oo uu khudbadiida ku darsado in Golayaashii Xeerarkaa ka soo saareen arrinkaa, markaa waxaan leeyahay shirkaa ha laga gaadhsiiyo madaxweynaha oo bahalkaas oo inaga baxay shirka madaxweynuhu ha ka sheego.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In Salaasada inta guurtida la inooga qaado Fadhiga, aynu deg-deg u ansixino hadii Ilaahay yidhaahdo.

**16. Md. Bashiir Tukaale:-** waan idin salaamayaa, runtii Xeerkani waa mid aad loogu baahnaa, shaqo badan ayaa laga soo qabtay xaga farsamada, waxaan odhan lahaa meel halka meel kastoo ka baxsan Xuduuda badaha Somaliland ha laga dhigo ( Xuduuda Biyaha Caalamiga ah), wixii bada somalialnd ka baxsan waa biyaha Caalamiga ah, Xeerkan aad baa loo danaynaa, markaa waxaan dhan lahaa

aynu deg-deg isu dhaafino, waayo siduu Xildhibaanadii iga horeeyay sheegeen wax badan buu inaga caawinaya xaga tababarka, shirka London Qodobada laga hadlayo waa ka mid budhcad badeedu, markaa waa in shirkaa laga gaadhsiiyaa,

**Waxaan soo jeedinayaa:**

- Xeerkan deg-deg ha loo ansixiyo oo aynu shirka London ka hor is-dhaafino.

17. **Md. Maxamed Saalax Cige**:- runtii xeerkani waa xeer awoodiisa leh, waa xeer u baahan in aad looga doodo oo la niqaasho weeyaan, waa xeer miisaankiisa leh, waa in mustaqbalka fod ee dheer lagu saleeyo oo aanu shirka London ku koobnaan, Xeer Caama oo la inaga dheegto oo la inaga daydo weeyaan, maaha xeer la fududaysan karo, marka faldanbiyeedyadiisa laga hadlayo ee dhacdadiisa laga hadlayo waa arrimo aad u farabadan weeye, Nuxurkiisuna wuxuu ku jira Xeerkii bada waana qayb ka mid xeerkii bada, markaa horta intaa la eego weeyo, qayb ka mid ahina waxay ku jirtaa xeerka Ciqaabta Guud, sidoo kalena xeerar badan buu taabanayaa, markaa waa inaan si kooban loo daraasadayn.

Wuxuu faaiido tahay xeerka wanaagiisa, hadaan sii guda galo xeerka waxaan jeclahay inaan dhowr qodob is dultaago, hadaan eego **Qodobka 1^aad^** tilmaami mayo Weerarka Xaga dibada laga soo qaado oo budhcadu markabka ama doonta ku soo qaado, waxa kaliya uu tilmaamayaa weerar shaqaalaha saara,

Mar walba oo Markab aad ku aragto xeerka diyaarad baa la socota oo **Qodobka 1^aad^** oo kaliya ayaad dhowr jeer ku arkaysaa, in xadido wixii bada mara lagu koobnaado maanay ahayn? ama la cadeeyo in labada lagaga hadlayo xeerka, markaa waxaan odhan diyaaradaha ha laga saaro oo Gaadiidka bada mara oo kaliya halagu daayo, in la cadeeyo weeyaan fal budhcadeedka uu xeerku sheegayo, sidoo kale xeerkani Xeerarka uu taabanayo in lala akhriyo ayaa loo baahan yahay.

**Qodobka 6^aad^** waxaa Raaci laha **Qodobka 5^aad^** oo waa in farqad **Qodobka 6^aa^** ka mida waa inuu noqdaa, sidoo kale **Qodobka 7^aad^** wuxuu Xidhiidh la-leeyahay **Qodobka 4^aad^** ee Xeerka, **Qodobka 8^aad^** eek u Xadgudub Sarkaal, isna waxaad moodaa iaanu cadayn Falka budhcad badeednimo iyo u-jeedada Masuuliyada markaa in laka saaro weeyaan oo la cadeeyo ciqaabta mid kasta la marinayo.

**Qodobka 9^aad^** ee iibsiga Xadhiga anigu waxaan soo jeedin lahaa in laga dhigo in 1 sano ama 2 sano la iibsan karo, Qodobka 12aad waxaan ka saari lahaa intan ***(waxaa lala akhrinayaa Xeerka Ciqaabta Guud).***

***Waxaan Soo jeedinayaa:-***

- Yeynaan ku deg-degin Xeerkan oo aad muhiim uh, waa inta saxo wax ka badal badan ayunu ku samaynaa,

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agg. Waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSL** |
| **--------------------------------------------------** | **-----------------------------------------------** |